Ministerie van Veiligheid en Justitie

# Waxaa lagaga shakisanyahay in aad fal dambiyeed gashay

## Shaki dambiyeed laga qabo daraadiis ayaa hey'ad booliis ku istaajisay kuna soo xirtay. Ama waxaa lagu soo casumay in lagu wareysto. Xuquuqdaada waa maxay maxaase dhacaayo marka lagu wareysto kadib?

**Waxay da'daada u dhexeysa 12 ilaa 18 sano waxaana lagaga shakisanyahay in aad fal dambiyeed gashay. Hey'adda booliiska ama hey'ad kale oo u xilsaaran dembibaaris ayaa ku soo qabtay kuuna soo waday xafiiska booliska si su'aalo lagu weydiiyo. Taas oo loo yaqaan wareysi. Ama waxaa lagugu casumay in aa timaadid xafiiska booliiska. Waxaa muhiim ah in aad ogtahay xuquuqdaada iyo waajibaadka. Sidaas darteed warqadaan warbixinta sii fiican u aqriso.**

### Su'aalo?

Kadib markaad aqrisid warqadaan su'aalo maa qabta? Waxaa su'aalahaas weydisaa qareenkaaga/lawyerkaaga, ama booliiska, ama hey'ad kale oo ku saabsan dembi baarista oo arrintaada la xiriira. Warqadaan marka laga hadlaayo booliis, waxaa laga yaaba in hey'ad kale oo dembi baarid sameyso in laga wado.

Warbixin dheeraad haddaad rabtid waxaa gasha www.juridischloket.nl ama waxaa wacda taleefanka 0900 - 8020 (€ 0,25 halki daqiiqo).

## Intii lagu qabtay maa lagu geeyey xafiiska booliska?

### Oggaaw xuquuqdaada

- Waxaad xaq u leedahay in aad oggaatid fal dembiyeedka lagaga shakisanyahay in aad sameysay
- Booliiska su'aalo ayuu ku weydii kara. Taas oo la dhaho wareysi booliis.
- Qasab kugu ma ahan in aad su'aalaha lagu weydiiyey ka jawaabtid. Xaq ayaa u leedahay in aad aamusnaatid.
- Inta oo wareysiga bilaabanin ayaa booliska waxay kugu xiraayo qareen ama looyar oo sharciyan kula talinaayo.
- Waxaa laga yaaba in ey wakhti qaadato inta oo qareenka ka imaanaayo, badana wuxuu ku imaana in ka badneen labo saac.
- Wadahadalka aa la yeelaneysid qareenka ka ma badno nus saac. Haddi aa wakhti dheeraad ah loo baahnaado in aa adiga iyo qareenka wadahadashiin waa suurtaga. Khrashka qareenka adiga laga ma rabo. Haddi aa adiga taqaanid qareen aa rabtid in u arrintaada ka shaqeeyo, waa lagu keena. Waxaa u sheegta booliska.
- Waxaa xaq u leedahay in u qareenkaaga ku la joogo marka mareysid wareysiga. Waxaa laga shakisanyahay fal dembiyeed fudeed ah miyaa, markaas waa in aa adiga ama waalidkaaga aa bixisiin khrashka qareenka. Haddi lagaga shakisanyahay fal dembiyeed culeys ah (tusaal ahaan xaditaan ama jir dil), markaas laga ma rabi in aa khashka iska bixisid. Qareenkaaga wadahadalka kowaad marka la yeelaneysid weydii dembiga lagaga shakisanyahay in u mid culees ama mid fudud yahay.
- Haddaadan rabin in oo qareen arrintaada ka shaqeeyo, waxaa doran karta in qof aa aamineysid oo kula galo wareysiga booliiska, qofkaas oo ahaan kara aabaha ama hooyada. Haddaad taas rabtid u sheeg booliiska.

*Haddi ee booliiska qareen ku qabanaayan waxay warbixin adiga shaqsiyan kugu saabsan ayaa waxaa laga diiwaangelinaaya hey'adda qaabilsan caawinaada xagga sharciga (Raad voor de Rechtsbijstand).*

- In kugu filan ma ku hadashid ama ma fahamtid af Nederlandees miyaa? Markaas waxaad xaq u leedahay qof ku turjumo wareysiga booliiska inta ku jirtid. Haddi aadan booliska fahmeynin, u sheeg. Turjumaanka wuxuu kugu caawi kara xataa marka aad la hadleysid qareenkaag. Taas oo lacag la'aan ku ah.
- Haddi la go'aamiyo in aa wakhti dheerad ah sii joogeysid saldhigga booliska, markaas booliska waxay wacaayaan waalid-kaaga ama mas'uul ka ah si loogu sheego in aad xirantahay. Mararka qaarkood waxaa laga yaaba in u sarkaalka cadaaladda oo go'aamiyo in wili loo sheegi karin qoyskaaga ama dadka ka mas'uulka ah, markaas waxaa arrinta lala socodsiina hey'adda ilaalinta caruurta.
- Haddi la go'aamiyo in aa wakhti dheerad ah sii joogeysid saldhigga booliska, oo aa qabin dhalashada Nederlandeeska markaas waxaad booliiska codsan karta in safaaradda ama qonsulka dalka u dhalatay in loo sheego in aa meeshaan ku xiran tahay.
- Waxaa dareemeysa in aa jirantahay miyaa, ama waxaa u baahan-tahay dhakhtar ama daawo, fadlan u sheeg booliiska.
- Waxaa xaq u leedahay in aa dukumiintiyadda arrintaada, haddi ey jiraan, aa aqrisatid. Sarkaalka cadaaladda waxaa laga yaaba mararka qaarkood in u diido in aa dukumiintiyada aad aqrisatid. Haddi aad af Nederlandees aqoonin ama wax yar kaliya aa ka fahmeysid, markaas waxaa xaq u leedahay in dukumiintiyadda qaarkood lagu turjumo ama qeybab ka mid ah lagu turjumo, tusaal ahaan qeybaha ugu muhiimsan amarka ku saabsan so xiritaanka lagu soo xiray iyo warqadda lagugu amraayo in aa maxkamadda hortimaadid.

*Meeqo saac ee booliiska ku hayn karaan?*

- Dembiga lagaga shakinaayo ee ku xirantahay, laakin ugu badnaan waxaa lagugu xiri kara xarunta booliiska muddo dhan 3 maal-mood iyo 18 saac.
- Haddi loo baahdo in oo wakhti intaa ka dheer lagu haayo, waa inuu qaadi go'aankaas gaara. Waxaa weydiisa qareenkaaga dooda ku furan haddi aa ka soo horjeedid xiritaankaaga ama xiritaan-kaas in wakhti dheeraad ah lagu daro.

## Waxaa lagu casumay miyaa in aa timaadid saldhigga booliiska?

Markaas adiga ama waalidkaaga aa inta wareysiga bilaaban ka hor la hadli kartiin qareen oo talo ka siinaayo arrintaas. Waxaa xataa ka hadasha in uu qareenka ku la joogi karo inta aa ku jirtid wareysiga ama in la oggoleen taas. Markaas waa in aa adiga ama waalidkaaga aa kharashka qareenka iska bixisiin.

## Qareen muxuu ku sameyna wareysiga **ka hor**?

Qareen wuxuu u dooda danta adiga aa leedahay kaliya. Qareenka inta lagu wareysan kahor wuxuu ku sameeyn kara arrimaha hoos ku xusan:

- in u ka la hadlo fal dembiyeedka lagaga shakisanyahay in aad gashay
- in u ku siiyo talo sharci
- in u ku sheego nidaamka wareysiga booliiska
- in u ku sheego xuquuqda iyo waajibaadka aad leedahay marka ku jirtid wareysiga
- in u la xiriiro qoyskaaga ama shirkadda u shaqeysid si oo ugu sheego xaalada ku jirtid, waa haddi aad rabtid

Waxaa ku hadashid wareysiga booliiska marka ku jirtid waa war muhiim ah, maadama oo hadalkaas qoraal laga sameynaayo. Qoraalkaas oo la dhaho hadalka geedi socodka ama 'proces-ver-baal'. Arrintaada waxaa lo gudbina sarkaalka cadaaladda miyaa, kadibna waxaa loo gudbina qaadiga maxkamadda miyaa? Markaas waxaa la fiirinaaya waxa ku qoran qoraalka hadalka geedi socodka. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in aa qoraalkaas si fiican u aqrisid. Haddi oo hadalkaaga sida u tiri loo qoray oo aa ku raacsantahay qoraalkaas, markaas booliiska waxay ku weydiinaayaan in aa magacaaga ku qortid qoraalka hoostiisa iyo in aa saxiixdid. Haddi aa ku raacsaneyn hadalka sida lagaga qoray, waxaa booliiska ka codsata markaas in qoraalka la toosiyo. Haddi oo qareenkaaga ku la joogo wareysiga, markaas wuu ku fiiri kara in hadalka aa dhahday in si sax ah loo qoray.

Booliiska ku ma dhageysanaayo markaad la hadleysid qareenkaaga. Adigo oggoleen qareenka qofna kala ma hadli karo waxa aad dhahday. Xataa booliiska u ma sheegi karo. Taas oo xataa turju-maanka qasab ku ah in u ilaaliyo sirta hadalka aa ku la hadashay qareenkaaga.

## Muxuu ku sameyn kara qareen inta wareysiga socdo?

Qareenka agtaada oo fadhisana inta wareysiga socdo, waxaana loo oggolyahay:

- qareenka wareysiga ka hor ama ka dib oo wax dhihi kara
- qofka ku wareysanaayo oo su'aalo weydii kara
- wuxuu ku weydiina in aa fahamtay waxa lagugu dhahay
- booliiska oo u sheega haddi aa su'aalaha fahmin
- wuxuu ilaalina in lagugu qasbin in aa wax dhahdid
- wareysiga oo socdo oo codsan kara in wareysiga la joojiyo si aa adiga iyo qareenkaaga u wada tashatiin. Adiga xataa waa codsan karta in wareysiga la joojiyo. Haddi aa codsiga joojintaan aa badisiin, waxaa laga yaaba in la diido.

Haddi aa jirantahay oo awoodin in aa wareysi gashid, u sheeg qareenkaaga. Qareenka ayaa markaas u sheegaayo booliiska arrintaas in ey jirto.

**Iska jir:** haddi aa kowdi dhahday ma rabi qareen, aa gadaal iska badashid, booliiska u sheeg. Markaas qareen aa lagu keena.

Haddi aa dhahdid ma rabi qareen in u arrinteyda ka shaqeeyo, waalidkaaga ama dadka sharciyan mas'uul ka ah ayaa go'aami kara in qareen lagu qabtu.

*Haddi oo qareen joogin wareysiga marka laga qaadaayo, laakin oo ku la joogo qof aa aamineysid*

Qofkaas waxaa loo oggolyahay kaliya in ey dhageystaan wareysiga. Wareysiga marka laga qaadaayo ayee ku la soo fadhisanaayaan, laakin waxna ma dhihi karaan. Qofkaas waa inuu jira 18 ama ka kor, la ma oggola in dembiga lagaga shakisanyahay in ey ku jiraan ama faragashteen. Qofka aa aamineysid waxaa noqon kara aabaha ama hooyada, ama qof kale oo qaangaar ah.

Waraaqadan waxaa soo saaray:
Wasaaradda Amniga iyo Cadaaladda
Postbus 20301 | 2500 EH Den Haag

Maarso 2017 | 101106

*Waxa ku qoran waraaqadaan xuquuq aa ku doodi kartid ma ahan*